




Miyuu qoysku u qalmi karaa caawimada maaliyada xataa haddii nalagu siiyay caymiska caafimaadka dhexda loo shaqeeyahayga?

Haddii aad isleedahay waxaad u qalantaa ama ay u qalmaan xubnaha qoyskaaga kaalmada Dhaqaale, la xariir NY State of Health si lagaaga caawiyo inaad codsato:

 Oonleen: nystateofhealth.ny.gov

 Taleefan ahaan:
1-855-355-5777 ama
TTY: 1-800-662-1220

 Si toos ah:
Caawimaad bilaash ah oo aad ka heleyso caawiye shahaado haysta

NY State of Health waxay u hoggaansantaa sharciyada xuquuqaha Dadwanaha ee Federaalka iyo sharciyada gobalka, cidnana kuma takoorto arrimo la xariira isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, taariikhda xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida fal dambi, aqoonsiga sinjiga, dookha galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, xaalada militarinimo, heerka gabood falka guriga ee dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

Qorshaha Caymiska Caafimaadka Qoyska Wuxuu sii noqonayaa Mid Aad u Qiimo jaban

Sharciga Cusub ee U qalmida ee loogu talagalay Kaalmada Dhaqaalaha ee loo maro NY State of Health

- Laga bilaabo Janaayo 1, 2023, u qalmitaanka kaalmada Dhaqaale ee loogu talagalay xubnaha qoyska waxaa lagu saleyn doonaa in la awoodi karo caymiska qoyska ee uu bixiyo loo shaqeeyaha/shirkada.
- Qorshaha caymiska qoyska waxaa loo tixgeliyaa mid "la awoodi karo" haddii lacagta joogtada ah ee la bixiyo ay ka yar tahay boqolkiiba 8.39 dakhliga qoyska.
- Haddii caymiska qoyska loo tixgeliyo inuu yahay mid aan la awoodi karin, markaas waxaa laga yaabaa in xubnaha qoysku u qalmaan kaalmo Dhaqaale.
- Arrintaan waxba kama badelayso qiimeynta awoodida caymiska ee shaqaalaha. Haddii shaqaaluhu uu cida uu u shaqeeyo/shirkadiisa ka heli karo hal caymis (caymiska shaqaalaha oo kaliya) oo uu awoodi karo, uma qalmi doono kaalmada Dhaqaalaha ee NY State of Health. Hase yeeshee, wali waxaa laga yaabaa in xubnaha qoyska ay u qalmaan.

Sharciga U qalmida Kaalmada Dhaqaalaha Kahor 2023

- Ilaa iyo sanadka 2023, caymiska caafimaadka waxaa loo geliyaa inuu yahay "mid la awoodi karo" ayadoo lagu saleynaayo qiimaha caymiska halka xabo ah (caymiska shaqaalaha oo kaliya).
- Ilaa iyo hadda, haddii lacagta lagu bixiyo caymiska halka xabo ah (caymiska shaqaalaha oo kaliya) uu ka yar yahay boqolkiiba 9.61 dakhliga qoyska shaqaalaha, waxaa loo tixgeliyaa mid la awoodi karo. Shaqaalaha shirkadooda ka heli kara caymiska caafimaad oo ay awoodi karaan uma qalmaan caawimaada dhaqaale ee qorshaha NY State of Health.
- Haddii shaqaaluhu uusan u qalmin kaalmada maaliyadeed ee NY State of Health iyadoo lagu salaynaayo sharcigaan, xubnaha qoyska shaqaalaha sidoo kale uma qalmaan kaalmada dhaqaale ee loo maro NY State of Health. Arrintaan waxay khusaysaa xitaa marka qorshaha caafimaadka qoyska ee uu bixiyo loo shaqeeyaha/shirkadu uu ku kaco wax ka badan boqolkiiba 9.61 dakhliga qoyska.

Maxaad sameyn Kartaa?

- Isticmaal Aalada Xisaabisa Kaalmada Dhaqaalaha ee NY State of Health: <https://info.nystateofhealth.ny.gov/estimate-financial-assistance>
- Aaladaan waxay ku tusunaysaa qiyaasta si aad u aragto in adiga ama xubnaha qoyskaagu u qalmaan kaalmada dhaqaale. U qalmitaankaaga dhabta ah waxaa la go'aamin doonaa kadib marka aad codsato.